


Dulmarka Qorshaha Istaraatiijiga ah ee The Arc Minnesota 2023 - 2025



Dhowrkii sano ee la soo dhaafay, dunideenu siyaabo badan ayay isku beddeshay. Hal shay oo aan isbeddelin waa ka go'naanshaha The Arc Minnesota. Waxaa naga go'an horumarka, ka mid noqoshada, iyo cadaalada dadka naafada ah ee ku nool Minnesota iyo wixii ka baxsanba. Qorshaheena istaraatiijiga ah wuxuu hagi doonaa shaqadeena laga bilaabo 2023 ilaa 2025, taasoo naga caawin doonta hadafkeena ee ah adduun loo dhan yahay oo soo dhawayn leh.



In loo dhiso Arc Dhammaantooda: Barnaamijyada iyo adeegyada in lagu aadiyo mabaadi'da Caddaaladda Naafada oo la hubiyo inay khuseeyaan dhammaan reer Minnesota.



In la dhiso isbahaysi xooggan oo taageereyaal ah si aan horay ugu dhaqaajino himiladeenna.



In la haysto oo la soo jiito shaqaale xoog leh, kala duwan oo loo dhan yahay, gaar ahaan kuwa naafada ah, oo noqo shaqo-bixiye dooq leh ee dhanka kuwa aan faa'iido doonka ahayn iyo tafaariiqdaba.



In aan xaqiijino dakhli la saadaalin karo, oo waara si loo maalgeliyo hadafka oona loogu adeego dhammaan dadka si siman gobolka oo dhan.

Himilada iyo Qiyamka ee The Arc Minnesota



Waxaan aaminsanahay inaad ka tirsan tahay adduun ku soo dhaweynaya—adduun kaasoo dhammaan dadka naafada ka ah dhanka garaadka iyo korriinka (IDD) lagu qiimeeyo, la ixtiraamo, oo barwaaqeysan.

Adduunka leh soo dhawaynta, dadka qaba IDD-ga waxay yeelan doonaan awood ay ku beddelaan nidaamyada iyo bulshada. Bulshooyinka waxay udub dhexaad u noqon doonaan cadaaladda. Dadka oo dhan waxay heli doonaan aqbalaada bulshada iyo xorriyada.

Himilada

Arc Minnesota waxay kor u qaadaa oo ay ilaalisaa xuquuqda bini'aadamka ee dadka qaba IDD-ga, iyagoo si firfircoon u taageeraya iyaga iyo qoysaskooda inta ay nool yihiin ka mid noqoshada buuxda iyo ka qaybgalka bulshadooda.

Arc Minnesota waxay bixisaa barnaamijyo, adeegyo, macluumaad, iyo u doodista sharci dejinta ee Minnesota oo dhan.

Qiyamka

Qiyamkaan ayaa hagaya dhammaan shaqadeena ee gobolka Minnesota oo dhan. Qiyamka Arc Minnesota iyo Arc's Value Village waa:

- Xuquuqda Aadanaha iyo Madaniga
- Isku-Doodista iyo Is-Hagidda
- Sinnaanta iyo aqbalaada bulshada
- Cadaalada naafada iyo Jinsiga



Ka hel macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Arc Minnesota, qorshaheena istaraatiijiga ah oo buuxa, iyo inbadan oo kale [ArcMinnesota.org](https://www.ArcMinnesota.org)